

515.00 DIIWAANADA

Qodobka Ficillada Macluumaadka ee Dawladda Minnesota wuxuu dhigayaa shuruudahan soo socda ee ku saabsan sidii ay dadwaynuhu ay gelitaan ugu heli lahaayeen diiwaanada dawladda:

Qayb-hoosaad 1. MACLUUMAADKA DADWEYNAHA

Dhammaan macluumaadka dawladda ee ay ururiyeen, abuureen, heleen, haayeen ama ay baahiyeen wakaaladaha dawladda, qayb-hoosaad siyaasadeed, ama nidaam ka shaqeeya dawlad goboleedka oo dhan waa inuu ahaadaa mid u furan dhammaan dadwaynaha haddii aanu qaanuunku ka dhigayn sir ama qarsoodi ku meelgaar ah sida ku cad qodobka 15.1642, ama dawladda dhexe aysan u aqoonsanayn mid aan loogu tala galin lagana dhowray dadwaynaha, ama marka la eego macluumaadka ku saabsan shakhsiyaad noqonaynin qarsoodi ama sir. Xukuummadda mas'ulka ka ah waakaalad kasta ee dawladeed, qayb-hoosaad siyaasadeed, iyo nidaamyada ka jira dawlad goboleedka oo dhan ayaa ku xafidaya diiwaanka ku saabsan macluumaad dawli ah heshiis iyo xaalad ka dhigaya kuwa si fudud oo aan jarrab ku jirin dadwaynuhu u heli karaan. Wixii macluumaad ah ee masawiran, koobiyaysan, laduubay, waa in loo tixgeliyaa inay fududahay in ay dadku heli karaan si kastaba baaxadoodu ha u weynaatee.

Qayb-hoosaad 2. NIDAAMYADA

Xukuummadda mas'ulka ka ah waakaalad kasta ee dawladeed, qayb-hoosaad siyaasadeed, iyo nidaamyada ka jira dawlad goboleedka oo dhami waa inay samaysataan nidaamyada la socda qodobada 15.1611 ilaa 15.1699 si loo hubiyo in codsiyada macluumaadka dawladda la helay, loona hogaansamay sida ugu haboon uguna dhakhsaha badan. Waa in si aad u sahlan oo dhamaysiran loogu ogolaadaa taariikh-yaqaanada, abtirsiinyo-yaqaanada iyo aqoonyahanada kaleba inay ka gutaan cilmi baaris baaxad weyn, kuna sameeyaan koobiyeen buuxda dhammaan diiwaanada kaydka ee ay ka midka yihiin macluumaadka dawlaga ah haddii aanu sharcigu si cad u diideynin.

Qayb-hoosaad 3. CODSIGA MACLUUMAADKA

Marka laga codsado xukuumadda mas'ulka ka ah ama cidda loo xil saaray, qof waa loo ogolaan karaa inuu ku baaro, koobiyeystona macluumaadka dawlaga ah waqti iyo meel munaasib ah, haddii qofku codsada, waa loo sheegi karaa macnaha macluumaadka. Xukuumadda mas'ulka ahi ama cidda loo xil saaray waa inay bixisaa nuqulada macluumaadka dawlaga ah marka laga codsado. Xukuumadda mas'ulka ah waxaa laga yaabaa inay ka dalabto qofka wax codsanaya inuu bixiyo qiimaha go'an ee samaynta, ansixinta, iyo ururinta nuqulada. Haddii xukuumadda mas'ulka ah ama qofka loo xil saaray uusan awoodi karin inuu bixiyo nuqulada waqtiga laga codsaday, waa inuu bixiyaa nuquladaas sida ugu dhakhsaha badan ee munaasibka ah.

DIWAANADA (ayaa wali socda)

Qayb-hoosaad 3. CODSIGA MACLUUMAADKA (ayaa sii socda)

Haddii Xukuumadda mas’uulka ah ama qofka loo xilsaaray uu go’aansado in macluumaadka la codsaday uu yahay mid qarsoodi loogu tala galay ayna tahay markaa inuu u diido qofka wax codsanaya inuu gelitaan u helo macluumaadkaan, xukuumadda mas’uulka ah ama qofka loo xilsaaray waa inuu si hadal ah sidaa ugu sheegaa qofka wax codsanaya waqtiga codsashada, iyo si qoraal ah markaa ka dib sida ugu dhakhsaha badan, waana inuu xigtaa qaanuunka, sirta ku meelgaarka ah, ama sharciga dawladda dhexe ee go’aanku ku salaysan yahay.

Qayb-hoosaad 4. SIRTA/QARSOODIGA MACLUUMAADKA

Xaaladda sir ahaaneed ee macluumaad ay leedahay wakaalaadi way is bedelaysaa haddii looga baahan yahay inay sidaas ahaato si ay ugu hogaansanto go’aamada sharci ama qaanuun maamul oo la xiriirta gudashada tilaabooyin sharciga waafaqsan, ama qaanuun khaas ah oo khuseeya macluumaadka ay leedahay wakaaladda wax baahinaysa ama helaysa.

TIXRAACYO CELIN:

TIXRAACYO SHARCI: